Haddii aad walaac ka qabto inay inantaadu gorsheynayso inay u safarto Suuriya (ama meel kale oo dagaal ka socdo) waa inaad la soo xidhidho booliiska degaankaaga ama soo wacdo 101. Haddii ay degdeg tahay soo wac 999. Iyaga ayaa si sir ah kaagala hadli walaacaaga iyagoo lana shaqeyn doona adiga iyo hay'adaha khaaska u ah si ay adiga iyo qoyskaaga ugu gargaaraan una caawiyaan. Tani waxa weeye ka hortagga masiibooyinka ee maaha mid danbiilayaal dadka dhalinyarada ah looga dhigaayo.

Haddii aanad ku niyad sameyn inaad si toosa ah walaacaaga ugala hadasho booliska, waxa jira dad kale oo la tabbo baray oo adiga iyo qoyskaaga idin siin kara caawimo muuqata iyo talooyin. Taas wax ka mid ah shaqalaha dareeylka caafimaadka, adeega bulshada, barayaasha iyo dawladaha hoose ee degaanka. Waxu ugu muhiimsan waa inaad heerarka ugu horeeya ciduun ka raadsato caawimo. Wixii xogta saxa ah ee Suuriya ku sabsan soo booqo

www.gov.uk/foreign-travel-advice/syria

Ololaha Ka-hortaga Masiibooyinka, isagoo la kaashanaayo Booliska UK iyo lamaanaha.
www.preventtragedies.co.uk

Booliiska UK iyo Lamaanaha

La shaqeynaaya hoyooyinka si looga hortago dhibaatooyinka

Suuriya - Xaqiiqda

Qaar ka mid ah hablaheena ayaa la duufsadey, la dhalan lumiyey, oo laga dhaadhiciyay inay u safraan Suuriya.

Suuriya waa meel aad khatar u ah. Dumarka iyo gabdhaha u safra Suuriya ayaa laga yaabaa inay arkaan shaqaaqo aad u weyn, waxa dhici karta inay iyaga shaqaaqo soo gaadho, ama marmarka qaarkood, ayaa laga yaabaa in la soo galiyo oo ay iyagu ka qeyb qaataan oo ay galaan shaqaaqada lafteeda. Xataa haddii anaay khatar toos ahi haysan, xoriyadda iyo fursadaha inta badan wadankan loo arko wax caadi ah ayaanay haysan dumarka Suuriya. Waxa laga yaabaa inay noqdaan qaar kaligood ah oo ay meel go'doon ku noqdaan, inay ku hoos noolaadaan maamul dulmi ah, inta badana aan loo ogolay inay xaafadahooga ay deganyihiin dhaafaan, iskaba daayoo inay gurigood dib ugu soo laabaane. Qoysaskoodii halkan joogay ayaa iyagu noqon doona qaar aad uga xun oo aan haysan fursad yar oo ay si sugan dib ugu soo ceshadaan kuwey jeclaayaan.

Sawirka la qurqurxiyey iyo borobogaandada laga soo daayey internedka, iyo marka taas lagu daro kalmadaha la rogey ee dadka rabba inay qaar mitid ah ka dhigaan carruurteena nugul ee jilicda san ee dhalinyarta bulshadadeena ka midka, ayaa ku dhiri galinaaya inay qaar ka mid ah dumarka iyo gabdhaha yaryari ay u safraan Suuriya. Marmarka qaarkood "qurqurxintu" waxay noqon kartaa in dagaal yahan la guursado, ama ku dawakhsan yihiin sidii ay diintooda ugu dabakhi lahaayeen nolosha casriga ah, iyagoo dareemaaya inay ku qasban yihiin in ay raacaan oo ay u arkayeen waajib diineed inay ku biiraan kuwa Suuriya.

Laakiin waxaynu ogney, inay nolosha xaqiiqda runta ah ee Suuriya ay aad uga duwantey sawirka la ina tusey.

Ma maqalno dumarka iyo gabdhaha raba inay si uun ugsoo laabtaan qoysaskoodii. Codkoodiina waa la lumiyey.

Waalidna ma rabbo in ilmihiisa khatar la galiyo, la isticmaalo ama ay ku jiraan xaalad ay ku dhiman karaan. Waase mid laga xumaado ah, in qisooyinka qoysaska ay soo gaadhay cawaaqib xumadda dumarka iyo gabdhaha u safray Suuriya ee aan soo laaban ay noqonayaan wax caadi ahaan ka sii badanaaya.

Maxay qoysasku sameyn karaan?

Waxa jira talaabooyin la sameyn karro xiliga hore si looga ilaayliyo dadkeena yaryar intaanay ka fikirin inay u safraan Suuriya.

Hooyooyinka ayaa inta badan ah kuwa qoyska arki karra calaamadaha ee arki kara isbadalka dabeecada ilmahooga. Iyaga ayaa sidoo kale ah kuwa ka dhaadhicin karra ilmahooga inaanay safrin.

Hooyooyinka ayaa ilaalin karra dadkooda ay jecel yihiin ka hor intaanay noqon goor danbe iyagoo qaadaaya talaaboyin, sida inay si cad ula socdaan waxay gabdhahoodu internedka ka sameynayaan, iyagoo dhiiri galinaaya ka wadahadalka furan ee waxyaalaha iyagga ay ka walaacsan yihiin.

Kalsoom Bashir oo ka socota INSPIRE waxay tidhi: *"Marka la arko burburka haysta qoysaska ay kuwey jeclaayeen u safreen Suuriya ayaan qoyskaska kula talin lahaa inay carruurtooda soo dhaweystaan – inay markasta u sheegaan in la jecelyey, inay qeyb ka yihiin qoys weyn iyo inay kala hadli karaan wax kasta oo ay ka walaacsan yihiin."*

Haddii aad ka warwarsan tahay inay inantaadu ay horeba uga fikiraysay inay Suuriya u safarto waxa inta badan jira calaamado digniin ah oo loo fiirsado, kuwaas waxa ka mid nogon kara:

- Inay ku weydiisato baasaaboorka iyo dhukumantiga cadeymaha ah ee kale sida warqadaha dhalashada iyo liisanka baabuurta – maaha kuweeda oo kaliye ee waa xataa kuwa haweenka kale ee qoyska.
- Inay bilowdo inay idin sii maca-salaameyso.
- Si kadis ah u bilowdo inay dhar cusub soo qaadato ama lacag kaydsato.
- Inantaadu waxa laga yaabaa inay joojiso la socodka asxaabteedii caadiga ahaa, ama ay wadato asxaab cusub oo aanad hore u arki jirin kuwaas oo u eeg inay saameyn xun ku leeyihiin.
- Waxa laga yaabaa inay muujiso aragtiyo, odhaah ahaan iyo iyadoo miidiyada internedka soo galisa, kuwaas oo taageersan aragtida xag jirka ah ama ficilada, ama ay bilowdo inay xiiseyso siyaasada ama siyaasada arimaha dibada marka aanay taas hore u muujin.